# IDEA Gaar Waxbarasho Cabashada Nidaamka Darteed/Dalabyada Dhagaysiga

## Oo Ay Kamid Tahay Dadajinta Dhagaysiga

### Tilmaamaha Waalidiinta Caruurta & Dhalinyarada (Da'da 3-21)

Daabacaadani waxay kamid tahay taxane Individuals with Disabilities Education Act, IDEA (Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Laxaadka La') ikhtiyaarada xalinta khilaafaadka. Tilmaamaha waalidka ee taxanahan waxaa kamid ah:

Dhaxdhaxaadinta Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA
Cabashooyinka Gobolka ee Loo Qoray Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA Cabashooyinka Nidaamka Aan Dhamaanin ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabyada Dhagaysiga IDEA
Kulamada Xalinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA

CADRE
Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education

IDEAs that Work
Office of Special Education Programs
U.S. Department of Education

*Daabacaadan waxay sharaxaysaa Cabashooyinka Nidaamka Socda/Dalayada Dhagaysiga guud ahaan Qaybta B ee IDEA. Looguma talo galin inay ka turjunto, waxka badasho, ama badasho wixii nidaam ilaalin ah ama waajib sharciga federalka ama gobolka ah.*

## Waa Maxay Cabashada Nidaamka Socda/Dalabyada Dhagaysigu?

Cabashada nidaamka socdaa waa waraaqo qoran oo loo adeegsado si loogu dalbado dhagaysi nidaamka socda oo la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta, ama qorista waxbarasho ilmaha laxaadka la', ama siinta iyada oo bilaash ah, waxbarashada shacabka ee munaasabka ah (free, appropriate public education, FAPE) ilmaha. Cabashada waxaa gudbin kara waalidka ama hay'ada shacabka (sida degmada dugsiga ilmahaaga). Tani waa bilawga nidaamka keeni kara dhagaysi rasmi ah kaas oo sarkaalka dhagaysigu natiijada go'aaminayo.

- Qofka ka cabanaya nidaamka socda waxa uu sidoo kale u aqoonsan karaa "dalab dhagaysi."”
- Tusaalayaasha goorta waalidku gudbin karo cabashada nidaamka socda waxaa kamid ah:
    - ♦ Waxaanad ku qanacsanayn natiijada qiimaynta ilmahaaga ee u qalankiisa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.
    - ♦ Waxaad u maleynaysaa in barnaamijka waxbarashada shakhsi ahaaneed (individualized education program, IEP) ee ay diyaariyeen kooxda IEP ilmagaahu aanu buuxinaynin baahiyaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.
    - ♦ Waxaad u aragtaa in dugsigu aanu adeegyada siinaynin taas oo uu kamid yahay IEP ilmahaaga.
    - ♦ Waxaanad ku qanacsanayn meesha ay ku qortay degmada dugsigu ilmahaaga ee ay go'aamisay.
- Macluumaadka sida loo buuxiyo cabashada nidaamka socda waxaa laga heli karaa hay'ada waxbarashada gobolka (state educational agency, SEA).

**Shuruucda gobolka ee la xidhiidha nidaamka xalinta muranka IDEA aad ayay u kala duwan yihiin.**

**Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay la xidhiidhaan hay'ada waxbarashada gobolka ama xarunta waalidka wixii macluumaad dheeraad ah.**

**Waxyaabaha Muhiimka ah ee Ay Tahay In La Ogaado Kahor Inta Aan La Buuxin Cabashada Nidaamka Socda/Dalabyada Dhagaysiga…**

- Dalabyada IDEA ee cabashada nidaamka socda waxaa kamid ah ugu yaraan macluumaadka soo socda:
  - ♦ Magaca ilmaha;
  - ♦ Cinwaanka ilmaha, ama macluumaadka lagala xidhiidhayo hadii ilmuhu darbi jiif yahay;
  - ♦ Magaca dugsiga ilmaha;
  - ♦ Sharaxa mushkilada gaarka ah ee ilmaha iyo macluumaadka la xidhiidha mushkilada; iyo
  - ♦ Fikiro iyo talooyin lagu xalinayo amuurta.
- Waalidka ama degmada dugsiga buuxinaysa cabashada/dalabka dhagaysiga waa inay nuqul u dirtaa cid kale isla marka ay buuxinayso SEA.
- Cabshada/dalabka dhagaysiga aanu la socon macluumaadka loo baahan yahay waxaa laga yaabaa in meesha laga saaro ama lasoo celiyo, kaas oo dib u dhigi kara xalinta amuurta.

## Maxaa Dhacaya Kadib Marka Aan Dalbado Dhagaysiga Nidaamka Socda?

- Caadiyan, SEA ama sarkaalka dhagaysiga ayaa kuu soo diri doona warqad adiga iyo degmada dugsiga taas oo xambaarsan macluumaadka waxa aad ka filan karto dhagaysiga. Warqadaa waxaa badanaa ku jira:
  - ♦ Magaca iyo macluumaadka lagala xidhiidhayo sarkaala dhagaysiga ku qoran kiiskaaga;
  - ♦ Wakhtiga uu nidaamku ku eeg yahay iyo macluumaadka muhiimka ah ee inta uu socday nidaamku dhacay;

- ♦ Macluumaadka ku saabsan shuruudaha kulanta xalinta khilaafaadka iyo sida loo heleyo cida dhex dhexaadinta; iyo
- ♦ Macluumaadka khayraadka sharciga oo bilaasha ah ama qiimo jaban oo aagaaga laga heli karo.

- Dugsiga Degmadu wuxuu qaadan doontaa 10 maalmood inay kaga soo jawaabto cabashada nidaamka socda. Hadii degmadu gudbisay cabashada, waxaad haysataa 10 maalmood inaad kaga soo jawaabto waxyaabaha lagu sheegey qoraalka cabashada.
- Degmada dugsigu waxay sidoo kale mudayn kartaa kulanta xalinta khilaafka inuu ku qabsoomo 15 maalmood gudahood oo ka bilaabanta wakhtiga ay soo gaadhay cabashadu, iyada oo adiga ama degmada dugsiga aad qoraal ku heshiisaan inaynaad yeelan kulan xalin khilaafka ah, ama aad doorbidaan inaad isticmaashaan cid dhex dhexaadin ah. Eeg *Kulamada Xalinta Khilaafka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA* wixii macluumaad dheeraad ah.
- Hadii dhagaysiga nidaamka socdaa uu qabsoomo, sarkaalka dhagaysigu waa inuu nuqul boosta ugu diraa cid walba go'aanka dhagaysiga mudo aan ka badnayn 45 maalmood kabacdi oo ka bilaabanta wakhtiga dhagaysiga ama, hadii sarkaalka dhagaysigu bixiyay mudo dheeraad ah oo dhagaysi, wakhtiga mudadaad dheeraadka ahi ku eeg tahay.

## Su'aalaha Ku Saabsan Cabashada Nidaamka Socda/Dalabka Dhagaysiga

### *Ma jiraa wakhti ay ku eeg tahay cabashada nidaamka socda/dalabka dhagaysigu?*

Hadii aanay jirin ka dhaafin xadidaadu, mushkiladaha aad ku qortay cabashada nidaamka socda waa inay dhaceen 2 sano gudahood kahor inta aanad cabashada gudbin, ama laga bilaabo taariikhda ay ahayd inaan ogaatid ee mushkiladu dhacday. Gobolada gaar, xadidaada wakhtigu way ka yar tahay 2 sano, markaa waxaa muhiim ah inaad cabashada sida ugu dhakhsaha badan u gudbiso.

### *Ma waxaa jira foom gaar ah oo ay tahay inaan isticmaalo?*

Maya. Waa inaad qaadataa foomka cabashada nidaamka socda ee aad heli karto laakiin khasab maaha inaad isticmaashaayi. Eeg foomka si aad u aragto macluumaadyada loo baahan yahay waxay kaa caawin kartaa inaad fikirkaaga isku dubo rido kahor inta aanad qorin cabashada.

*Waa maxay mudada xalinta khilaafku?*

Waa 30-ka maalmood ee ka bilaabma kadib marka degmadu ay soo gaadho cabashada nidaamka socda ee waalidka. Waa wakhtiga uu qabsoomo kulanka xalinta khilaafku. Kulanka xalinta khilaafku waxa uu waalidiinta iyo degmooyinka dugsiga siiyaa fursad ay ku xalisan karaan mushkilada ka dhax jirta kahor inta ayna qaban dhagaysiga.

*Dugsigee ayuu ilmahaygu dhiganayaa kadib marka aan gudbiyo cashada nidaamka socda/dalabka dhagaysiga?*

Laga bilaabo wakhtiga cabashada nidaamka socda la gudbiyay ilaa inta laga xalinayo, ilmahaagu waxa uu ku jirayaa goobta uu waxbarashada wakhtigan ka dhigto, iyada oo adiga iyo dugsigu aad wax kale ku heshiisaan moojee. Tani badanaa waxaa loo yaqaan "kuxidhan" ama "heegan." Hadii cabashadaadu la xidhiidha gelida dugsiga dadwaynaha oo markii ugu horeysey ah, ogolaanshaha markaad bixiso, waa in ilmahaaga la qoraa dugsiga shacabka ilaa dhamaan amuurta la xidhiidha cabashada nidaamka socda la xalinayo.

*Ma waxaan u baahanayaa looyar marka aan gudbinayo cabashada nidaamka socda/dalabka dhagaysiga?*

Maya. Waalidku uma baahna looyar si uu u gudbiyo cabashada nidaamka socda. Iyada oo ay eegayaan dacwada nidaamka socda, waalidiintu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay looyar shaqaalaysiistaan. Caadiyan degmooyinka dugsiyada waxaa matala looyar. Xarumaha waalidka ayaa sidoo kale ka caawin kara sidii loo heli karaa looyarka.

*Siday wax noqonayaan hadii aad turjumaan u baahanahay?*

Waa muhiim inaad fahmi karto oo aad si buuxda uga qayb geli karta dacwada nidaamka socda. U sheeg cid kasta oo ku lug leh inaad turjumaan u baahan tahay. La xidhiidh SEA-gaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee xalinta khilaafka waxbarashada gaarka ah ama ikhtiyaarada xalinta khilaafka ee laga heli karo IDEA, booqo websaytka CADRE:
cadreworks.org

## Su'aalaah Ku Saabsan Dhagaysiga Nidaamka Socda

*Maa maxay dhagaysiga nidaamka socda?*

Dhagaysigu waa nidaam rasmi ah marka loo eego ikhtiyaarada kale ee xalinta khilaafka. Waxaa qabta sarkaalka dhagaysiga kaas oo eeg macluumaadka dhinac kasta miiska keeney, waxa uu su'aalo waydiin karaa markhaatiyo, oo waxa uu go'aan kasoo saarayaa khilaafka. Sarkaalka dhagaysigu waa dhexdhexaad waxaanu aqoon u leeyahay IDEA.

*Goorma iyo halkee ayuu ka qabsoomaa dhagaysigu?*

Dhagaysiga nidaamka socda waa in lagu qabtaa goobta ku haboon wakhtiga ku haboon ee waalidka iyo ilmuhu ka qayb geli karaan. Dhagaysigu waxa uu mararka qaar qaataa dhawr maalmood. Caadiyan waxaa lagu qabtaa dhisme shacab oo leh qol shirar oo dadka qaadi kara, sda maxkamada, hoolka shirarka magaalada, iyo laybareeriyada.

*Sarkaalka dhagaysigu wax maka badali karaa 45 maalmood ee dhagaysiga loo asteeyay?*

Haa. Sarkaalka dhagaysigu waa uu bixin karaa wakhti dheeraad ah oo dhagaysiga ah marka adiga ama dugsigu dalbado.

*Yaa la filayaa inay kasoo qayb galaan kulanka?*

Guud ahaan, waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga, looyaradooda, markhaatiyo, iyo dadka kale ee lagu soo casuumay inay ka qayb galaan dhagaysiga nidaamka socda. Sidoo kale, waalidiintu waxay sidoo kale dooran karaan inay u ogolaadaan xubno katirsan shacabku inay daawadaan dhagaysiga.

*Go'aanka kaso baxa dhagaysigu siduu dhaqan gal u yahay?*

SEA ayaa ka masuul ah inuu xaqiijiyo in loo hogaansamo go'aanka sarkaalka dhagaysiga ah iyada oo go'aanka ambiil laga qaatay moojee. SEA waa inuu la wadaagaa nuqulo (laga saaray macluumaadka haybta shakhsi ahaaneed sheegaya) gudida latalinta gobolka, waana in go'aanka uu la socodsiiyaa shacabka.

*Ambiil kama qaadan karaa go'aanka dhagaysiga?*

Haa. Labada dhinacba waxay ambiil ka qaadan karaan go'aanka dhagaysiga nidaamka socda. Wixii macluumaad dheeraad ah ee nidaamka ambiilka ee gobolkaaga, eeg ee SEA-gaaga ama xarunta waalidka laga heli karo. Waxaa muhiim ah inaad ogaato mudada rasmiga ah ee aam ambiilka ku qaadan karto.

Gobolado badan, ambiilka waa in mudo yar oo gaaban lagu xareeyaa, sida 30 ama 60 maalmood gudahood kadib marka go'aanka sarkaalka dhagaysigu soo baxay.

### *Xaq miyaan u leeyahay inaan nuqul ka samaysto duwaanka dhagaysiga?*

Haa. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan duwaanka dhagaysiga, macluumaad darsida, iyo go'aanada dhagaysiga iyada oo aan wax kharash ah laga qaadaynin.

### *Siday wax noqonayaan hadii aanay degmada dugsigu u hogaansamin go'aanka sarkaalka dhagaysiga?*

Hadii ayna degmada dugsigu u hogaansamin go'aanka sarkaalka dhagaysiga, waxaad u gudbin kartaa qraal cabasho ah SEA-gaaga, kaas oo aad kaga dalbanayso inay go'aanka ku khasbaan inuu u hogaansamo. Eeg *Cabashooyinka Lagu Sheegey Qoraalka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA* wixii macluumaad dheeraad ah.

## Waxyaabaha La Isla Eego ee Ku Saabsan Cabashada Nidaamka Socda/Dhagaysiga

- Nidaamka socda waxaa lagu tixgaliyaa ka ugu dhib badan, ikhtiyaarka xalinta khilaafka aad wada shaqayn la'aanta ah, iyo kuwa waxyeeli kara xidhiidhka wada shaqayneed ee baraha iyo qoysaska.
- Waxyaabaha qaar waalidku ka warwaro, sida cida ay shaqaalaysiinayso degmada dugsigu, munaasab kuma aha nidaamka dhagaysiga.
- Dhigaysiga nidaamka socda, sarkaal dhagaysi oo aan garanaynin ilmahaaga ayaa go'aanka soo saaraya.
- Kooxda dhex dhexaadinta ama xalinta khilaafka, xalka waxaa gaadhaya adiga, shaqaalaha dugsiga, iyo dadka kale ee si wanaagsan u yaqaan ilmahaaga..
- Badi cabashooyinka nidaamka socda waxaa lagu xaliyaa iyada oo aan loo baahan dhagaysi, badanaa iyada oo la adeegsanayo cid dhex dhexaadin ah ama kulan xalinta khilaafka ah.
- Si loo ilaaliyo dhex dhexaadnimada sarkaalka dhagaysiga, sarkaalka dhagaysiga looma ogola inuu labada dhinac midkoodana gaarkood ugala hadlo cabashada nidaamka socda ama dhagaysiga.
- Go'aanka sarkaalka dhagaysigu waa sharci, xataa hadii aanad ku qancin natiijada kasoo baxda, iyada oo ambiil laga qaatay go'aanka moojee.

# Dalabka Dadajinta Dhagaysiga

Dadajinta dhagaysiga waxaa la dalban karaa xaalado gaar ah. Noocyada gaarka ah ee cabashada nidaamka socda waxaa la isticmaalaa marka waalidku ayna qancin go'aanada anshax marinta degmada dugsiga taas oo meesha uu dhiganayo ilmoodu khusaysa.

Waalidiintu waxay gudbin karaa dalabka dadajinta dhagaysiga marka ayna ku qanacsanayn go'aanka degmada dugsiga hadii habdhaqanka ilmuhu la xidhiidho laxaad la'aantiisa. Go'aankan waxaa loo yaqaan soo bandhigida ka go'naanshaha.

Degmada dugsigu waxay gudbin kartaa dalabka dhagaysiga in lasoo dadajiyo marka ay u aragto in handhaqanka ilmuhu khatar ku yahay ilmaha ama kuwa kale.

- Dalabka dadajinta dhagaysigu waa inay la socotaa macluumaad lamid ah ka cabashada nidaamka socda.
- Gobolkady waxaa dhici karta inay ku kala duwan yihiin shuruudaha dalabyada dadajinta dhagaysiga. Nidaamku waxaa dhici kartaa inuu sidoo kale ka duwan yahay cabashada nidaamka socda kale.

## Maxaa dhacaya Kadib Marka Aan Dalabka Dadajinta Dhagaysiga Gudbiyo?

- Kulanka xalinta khilaafka waa inuu 7 maalmood gudahood ku qabsoomaa, iyada oo adiga iyo dugsiga degmadu aad ku heshiisaan qoraal ahaan inaynaad yeelan kulan xalin khilaaf, ama inaad isticmaashaan cid dhex dhexaadin ah.
- Hadii aad khilaafka lagu xalin 15 maalmood gudahood, waxaa iman doona mudaynta dhagaysiga.

- Dhagaysiga waxaa in la qabtaa 20 maalmood oo waxbarasho gudahood marka lasoo gudbiyo dalabka dedejinta dhagaysiga.
- Sarkaalka dhagaysiga waa inuu kusoo saaraa go'aanka 10 maalmood oo waxbarasho gudahood oo ka bilaabanta taariikhda dhagaysiga.

***!* Qoraal Ku Saabsan Wakhtiga Dhagaysiga La Dadajiyay *!***

Waxaa muhiim ah in maanka lagu hayo farqiga wakhtiga la dadajiyay, gaar ahaan inta lagu jiro ama marka uu dhamaado wakhtiga dugsigu fasaxa ku jiro, sida fasaxa xagaaga iyo fasaxyada dhamaadka seemistarada.

Maalmaha waxbarashadu isku macnno ayay u leeyihiin dhamaan caruurta dugsiga ku jirta, kuwaas oo ay kamid yihiin caruurta laxaadka la' - taas oo ka dhigan wakhtiga ardayda ay tahay inay tagaan waxbarashada.

Maalmaha taariikhda waxay ka dhigan yihiin dhamaan maalmaha oo dhan, oo ay ku jiraan ayaamaha fasaxa iyo ciidaha.

## Su'aalaha Ku Saabsan Dhagaysiga Nidaamka Socda ee Lasoo Dadajiyay

*Sidoo Kale Eeg Su'aalaha Ku Saabsan Cabashooyinka Nidaamka Socda/Dhagaysiga*

*Halkee ayuu ilmahaygu dugsiga ka dhigayaa marka kadib marka aan dalabka dadajinta dhagaysiga gudbiyo?*

Ilmahaagu waa inuu kusii jiraa qaabka waxbarashada ee uu u dooreen kooxda IEP-giigu ilaa inta sarkaalka dhagaysigu soo saarayo go'aanka ama mudada ay ku eeg tahay anshax marinta, iyada oo adiga iyo dugsigu aad si kale ku heshiisaan moojee

*Sarkaalka dhagaysigu ma kordhin karaa mudada dedejinta dhagaysiga?*

Maya. Sarkaalka dhagaysigu ma kordhin karo mudada xalinta khilaafka, taariikhda dhagaysiga, ama wakhtiga lagu soo saarayo go'aanka dalabka dhagaysi degdeg ah.

### *Siday wax noqonayaan kadib dhagaysiga la dadajiyay?*

Sida go'aanada dhagaysiyada kale, SEA waa in uu xaqiijiyaa in go'aanka sarkaalka dhagaysiga ah la raaco, iyada oo ambiil laga qaato go'aanka moojee. SEA waa inuu sidoo kale nuqul la wadaagaa (kaas oo laga saaray macluumaadka sheegaya haybta) gudida la talinta gobolka, oo uu go'aanka la socodsiiyaa shacabka.

### *Siday wax noqonayaan hadii aan ku qanci waayo go'aanka dhagaysiga?*

Go'aanka dedejinta dhagaysiga waxaa laga qaadan karaa ambiil. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida ambiilka looga qaato gobollaaga, waxaa ka heli karaa SEA-gaaga ama xarunta waalidka. Waxay garanayaan wakhtiga muhiimka ah iyo shuruudaha buuxinta.

## II Macluumaad Muhiim ah

Liiska wakhtigan ee dhamaan xarumaha waalidka ee dalka oo dhan waxaa laga heli karaa Xarunta Macluumaadka Waalidka iyo Khayraadka (Center for Parent Information and Resources, CPIR): parentcenterhub.org/find-your-center ama lahadal (973) 642-8100

Xarunta Xalinta Khilaafka Munaasabka ah ee Waxbarashada Gaarka ah (Center for Appropriate Dispute Resolution in Special Education, CADRE) waa xarun kaalmo farsamo oo qaran oo qalin khilaafka ah: cadreworks.org
ama kala hadal (541) 686-5060

Macluumaadka ku saabsan Sharciga Waxbarshada Shakhsiga Laxaadka La' (IDEA) waxaa laga heli karaa onlayn ahaan:
https://sites.ed.gov/idea/

# Ogsoonaw

## Hel Macluumaadka Lagala Xidhiidhayo Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

**Region 1 Parent TA Center**
NJ Statewide Parent Advocacy Network
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100
Faakis: (973) 642-8080
Websayt: spanadvocacy.org

**Region 2 Parent TA Center**
Exceptional Children's Assistance Center
907 Barra Row, Suites 102/103
Davidson, NC 28036
Taleefan: (704) 892-1321
Faakis: (704) 892-5028
Websayt: ecac-parentcenter.org

**Region 3 Parent TA Center**
Parent to Parent of Georgia
3070 Presidential Pkwy, Suite 130
Atlanta, GA 30340
Taleefan: (800) 229-2038
Faakis: (770) 458-4091
Websayt: p2pga.org

**Region 4 Parent TA Center**
WI FACETS
600 W. Virginia St., Ste. 501
Milwaukee, WI 53204
Taleefan: (877) 374-0511
Faakis: (414) 374-4655
Websayt: wifacets.org

**Region 5 Parent TA Center**
PEAK Parent Center
611 N. Weber, Suite 200
Colorado Springs, CO 80903
Taleefan: (800) 284-0251
Faakis: (719) 931-9452
Websayt: region5ptac.org

**Region 6 Parent TA Center**
Matrix Parent Network & Resource Center
94 Galli Drive, Suite C
Novato, CA 94949
Taleefan: (415) 884-3535
Faakis: (415) 884-3555
Websayt: matrixparents.org

**Center for Parent Information and Resources (CPIR)**
35 Halsey St., 4th Floor
Newark, NJ 07102
Taleefan: (973) 642-8100 Faakis: (973) 642-8080
Websayt: parentcenterhub.org

## Xarunta Waalidka Deegaankaaga:

CADRE waxay waraaqa u diyaarisaa si waafaqsan xeerka Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Heshiika Xafiiska Isku Duwida Baraamijyada Waxbarashada Gaarka ah Lam. H326D080001. Tina Diamond, Ph.D., waxay ku shaqaysaa sarkaalka mashruuca. Aragtiyada lagu soo bandhigay halkan khasab maaha inay ka turjumaan aragtida ama shuruucda Waaxda Waxbarashada. Wixii alaab ah, adeegyo ama shirkado lagu sheegey ee qoraalka sare kaas oo ay ku amaantay Waaxda Waxbarashada Maraykanku maaha mid loogu talo galay ama qiyaas lagaga bixiyay. Qoraalkani waa mid dadwayne. Waa la ogol yahay in qayb kamid ah ama dhamaan dib nuqulo looga samaysan karo. Inkasta oo in ogolaansho la dalbado marka dib loo daabacayo ayna ahayn mid waajib ah, diidmada waxaa leh: CADRE (2014). Cabashooyinka Nidaamka Socda ee Waxbarashada Gaarka ah/Dalabka Dhagaysiga ee IDEA waxaa kamid ah dalabyada dadajinta dhagaysiga, Eugene, Oregon, CADRE. Daabacaada waxaa sidoo kale kamid ah linkiyo iyo Cinwaano Websayto (URLs) ay sameeyeen oo ay gacantana ku hayaan hay'ada madax banaan oo loogu soo geliyay si ay akhristayaashu u heli karaan. Waaxdu kama masuul ah saxnimada macluumaadkan. Taariikhda Daabacaada: Janaayo 2014.